QOFKA WAKHTIGIIGA UGU DEEQAY WAAXDA CARRUURTA / HESHIISKA KA TANAASULIDDA TABOBARKA SHAQADA

Fadlan Si Taxaddir leh u Akhri, Saxeex oo Kusoo Celi Degmada Washington

Barnaamijka Hagista ee Waaxda Carruurta Degmada Washington waxa uu kaaga mahadnaqayaa adiga iyo ilmahaaga sida aad u danaynaysaan inaad noqotaan la-hage. Arjiga waxaa loogu talogalay inuu noqdo qaab macluumaad lagu gudbinayo oo lagu helo oggolaashaha waalidka/koriyaha si uu ugu oggolaado in ilmihiisu uu ka qaybgalo Barnaamijka Hagista ee Waaxda Carruurta Degmada Washington.

Marka aad noo keento ama noo soo dirto arjiga buuxa, waxaanu qiimayn doonaa macluumaadka waxaanan kuu soo diri doonaa warqad lagugula socodsiinayo haddii ilmahaaga loo qaatay barnaamijka hagista. Badankiisa macluumaadka aad ku bixisay bushqaddan arjiga waxaa loo adeegsan doonaa sidii ilmahaaga loo waafajin lahaa hage munaasab ah. Markaa, shaqaalaha hagista, ee wakhtigaas, waxay u baahan yihiin inay heli karaan oo ay la wadaagi karaan macluumaadkan hagayaasha mustaqbalka iyo cidaha kale marka ay danaha ugu fiican ee iswaafajintu ku jirto. Laakiin, bixino mayno magacyada ilaa uu rabitaanku ka yimaado la-hagaha, waalidka/koriyaha, hagaha waxa marka hore cidba cidda kale laga siiyaa macluumaad ayna haybtu la socon.

Fadlan xarfaha hore ee magaca ku qor mid kasta oo soo socda

_____ Waxaan siiyay oggolaanshahayga xogogaalka ah iyo fasax ilmahaygu inuu ka qaybgalo Barnaamijka Hagista ee Waaxda Carruurta Degmada Washington iyo wixii hawlo ah ee la xidhiidha.

_____ Waxaan oggolaaday in ilmahaygu u hoggaansamo dhanmaan tilmaamaha barnaamijka hagista oo aan fahansanahay in wixii ku xadgudub ah ee uu ilmahaygu la iman karo ay keeni karaan in la hakiyo iyo/ama meesha uu ka baxo xidhiidhkii hagistu.

_____ Waxaan halkan ku qirayaa in ilmahayga uu qaadi doono haguhu iyo/ama shaqaalaha Waaxda Carruurta Degmada Washington ama wakiiladooda inta uu ku jiro Barnaamijka Hagista ee Waaxda Carruurta Degmada Washington, qaadistaasi waa ikhtiyaar waxaana ka masuul ah iyaga.

_____ Waxaan fahansanahay inay tahay inaan soo celiyo dhammaan shayada aan soo buuxiyay oo aan soo raaciyo arjigan, iyo in wixii macluumaad ah ee wax ka dhiman yihiin keeni karo in dib u dhac ku yimaado hawsha:

- Foomka Fasaxa Macluumaadka iyo Xidhiidhka
- Foomka Sahanka Danaynta

Waxaan oggolaaday in Barnaamijka Hagista ee Waaxda Carruurta Degmada Washington ay isticmaasho wixii sawir ah ee ilmahayga laga qaaday inta uu ku jiro barnaamijka hagista. Sawiradan waxaa loo adeegsan karaa xayeysiisyada ama wixii agab ah ee kale ee la xidhiidha ee lagu suuqgaynayo.

☐Haa, Waan ku raacsanahay
☐Maya, Kuma raacsani

_____ Waxaan danaynayaa inaan ka qaybgalo mid ama wax ka badan oo hawlaha dadka wakhtigooda ku deeqay ama tabobarka shaqada ah [wakhti ku deeqe] taas oo si qayb ah ama dhammaystiran ay kafaalo qaadday, maamusho, ay isku dubbariday ama ay qabanayso Degmada Washington, Waaxda Carruurta Oregon [Degmada]. Taas oo baddalkeeda ka qaybgalka hawlaha dadka wakhtigooda ku deeqay ah, waxaan halkan si ka noqod aan lahayn oo shuruud la'aan ah ku bixiyay oo aan ku oggolaaday in ilmahayga, aniga, cidda i dhaxlaysa, hantidayda, iyo caymisyada, sida soo socda.

1. **ARAGTIDA KHATARTA.** Marka uu ka qaybgalayo hawlaha dadka wakhtigooda ku deeqay, ilmahaygu waxa uu awoodaa inuu diido inuu ka qaybgalo ama uu ka joogo haddii isaga/iyadu ay dareento badbaado la'aan. Waxaan fahansanahay in ka qaybgalka hawlaha dadka wakhtigooda ku deeqay ay ku lug yeelan karaan waxoogaa khatar ah iyo waxyeelo shil, hanti burburta ama waxyeelo soo gaadho, dhaawac shakhsi ahaaneed iyo jidheed, dhimasho, iyo waayis dadka dhexgal iyo dhaqaale. Tani waxa dhici karta inayna kaliya ka iman ficilkayga, wax ka qabad la'aantayda, ama dayacayga, laakiin ficilka, wax ka qabad la'aanta, ama dayaca dad kale. Sidoo kale, waxaa iman kara khatar aanan ogayn ama xaalado aan iminka la sii saadaalin karin. Waxaan fahansanahay oo aan eegey oo aan qiimeeyay nooceeda, inta ay le'eg tahay iyo baaxaddeeda khatarta ku lugta leh, waxaanan ikhtiyaarkayga aniga oo xor ah doortay inaan qaato khatarahan. Waxaan caddaynayaa in ilmahayga jidh ahaan iyo maskax ahaan uu si buuxda uga qaybgali karo hawlaha dadka iskood isku xilqaamay. ***Waxaan oggolaaday daawaynta haddii ay xaalad gurmad degdeg ahi timaado ama dhacdooyin kale kuwaas oo, marka uu u arko hawlwadeenka meesha joogaa in aan u baahannahay daryeel daawayn. Waxaan sidoo kale oggolaaday in aan bixiyo dhammaan kharashka la xidhiidha daryeelka daawaynta noocan ah, iyo inaanan***

u qabsan oo aan difaaco Cida Laga Dhaafay wixii kharash ah ama sheegasho ah ee ka iman karta daryeelka daawayntan.

2. **KA DHAAFIDDA KHASAARAHA** anigu, ilmahayga iyo naftayda, cidda i dhaxlaysa, loo-dardaarmayaasha, maamulayaasha iyo cidda lagu qoro, waxaan ka dhaafayaa oo aanan waligeed waxba laga waydiinaynin Degmada Washington, Oregon, iyo/ama saraakiisheeda, wakiiladeeda iyo shaqaalaha wixii dalab ama sheegasho ee waxyeelo ama dhaawac ah, ee ka yimaada wixii tallaabo ah, ee la og yahay ama aan la ogayn, ee Degmada Washington, Oregon, iyo/ama saraakhiisheeda ama shaqaalaheeda aan u qabsan lahaa, iyo dhammaan wixii khasaare ah ee ku yaala Xeerka Sheegashada Oregon Tort, ORS 30.260-30.300, wixii waxyeelo ama dhaawac ah ee soo gaadha caafimaadkayga oo ka yimid ama ka dhashay hawlahayga wakhti ku deeqidda ee Degmada Washington. Ka dhaafiddaasi meesha kama saarayo ama lagagama tanaasulayo wixii xuquuq ah oo uu i siiyay Xeerka Sheegashada Oregon Tort, ORS 30.260-30.300, in aan iska difaaco wixii dalab, sheegasho, dacwad ama tallaabo iga dhan ah, ama khasaaraha aniga igu waajibi kara, ama ka iman kara hawlahayga wakhti ku deeqidda Degmadu oggolaatay.
3. **WARGELINTA KHARASHKA CAAFIMAADKA EE DHAAWACA.** Waxaan bixin doonaa kharashka caafimaadka gurmadka degdegga ah iyo dhammaan kharashaadka caafimaadka ee daba socda ee ka yimid wixii xanuun, dhacdo, ama dhaawac ah ee la xidhiidha hawlaha wakhti ku deeqidda. Haddii ilmahaygu xanuunsado, uu shil ku dhacay ama dhaawacmay iyada lagu jiro hawlaha wakhti ku deeqidda, ilmahaygu waa inuu si wanaagsan u gaadhsiiyaa xanuunka, dhacdada ama dhaawaca horjoogaha Degmada Washington.
4. **DIFAACIDDA.** Waxaan oggolaaday in ilmahayga uu ka masuul yahay wixii ficil ah ee uu ku kaco ee ka baxsan hawlaha wakhti ku deeqidda. Sidaa darteed waxaan difaaci Degmada Washington, saraakiisheeda, shaqaalaha iyo wakiiladeeda wixii sheegasho ama tallaabo ku lid ah Degmada Washington ee ka iman kara tallaabada ilmaha ee ka baxsan hawlaha wakhti ku deeqidda. Haddii ilmahayga habdhaqankiisu uu yahay qaab waafaqsan hawlaha ku deeqidda wakhtiga, waxaan fahansanahay in Degmada Washington difaaci doonto oo ii magdhabi doonto aniga wixii sheegasho ah ama wixii tallaabo waxyeelo ah ee aniga magacayga lagu sheegey.
5. **SHAQAYNTA.** Haddii wax kamid ah heshiiskan uu socon waayo ama la dhaqangelin waayo, dhammaan wixii kale ee tallaabooyin ahi waa inay sii socdaan oo ay dhaqangalaan. Heshiiskani waxa uu ka sarreeyaa dhammaan wixii weedho hadal ama qoraal ah ee anigu aan sheegey ama la igu yidhi ee la xidhiidha wakhti ku deeqidda. Waxaan fahansanahay in aanan meesha ka saari karin, joojin karin ama ka noqon karin Heshiiska Ka Tanaasulidda waxay doonto sababtu ha noqotee.

Saxeexa aan hoose saxeexayo, waxaan caddaynayaa run ahaanta dhammaan macluumaadka ku qoran arjigan oo aan oggolaaday dhammaan shuruudaha iyo xeerarka kor ku qoran. **WAXAAN SI BUUXDA U AKHRIYAY OO TAXADDIR LEH HESHIISKAN, OO WAXAAN SI BUUXDA U FAHMAY WAXA KU QORAN, WAXAANAN SI ISKAA AH U OGGOLAADAY QODOBADIISA.**

SAXEEXA WAALIDKA: _____

MAGACA DAABACAN: _____

MAGACA ILMAHA OO DAABACAN: _____

TAARIIKHDA LA SAXEEXAY: _____

CIWAANKA: _____

CIWAANKA IIMEYLKA: _____

LAMBARKA TALEEFANKA LALA XIDHIIDHAYO: _____

MAGACA/TALEEFANKA CIDDA LALA XIDHIIDHAYOGURMAKDA DEGDEGGA AH:
_____